

## **Haddii aad horey uga tirsanayd shaqaalaha ama aad Shaqaale ka tahay Gold'n Plump ama ka mid tahay shaqaalaha nadaafadda qaabilsan, waxa suuro ah gal in aad lacag ka hesho (lagaa siiyo) heshiiska la gaaray.**

*Maxkamadda dawladda dhexe ayaa ogolaatay ogeysiiskan. Tani ma aha xayeyiin ka timid qareen. Cidina dacwad kuuma haysto.*

- Heshiis ay wada gaareen shirkadda Gold'n Plump iyo shaqaalaha ayaa shaqaalaha u ogolaanaya in \$1.2 milyan oo magdhaw la siiyo shaqaalahii horey ugu shaqayn jirey iyo kuwo hadda u shaqeeya shirkadda Gold'n Plum tasoo ah waqti dheeraad ah oo ay shaqeeyeen oo lacag ahaan loo siinayo.
- Waxaa intaa dheer, sida lagu sharxay ogaysiiskan, in heshiiska ay ka mid tahay inay shirkadda Gold'n plum ay bedesho sida ay u shaqayso si shaqaalaha hadda u shaqeeya iyo kuwo ay shaqaaleyn doonto magdhaw laga siiyo waqtga ay dharka shaqada xirtaan iskana bixinayaan taasoo loo yaqaan "heeryo rarid iyo dajin" ee ku saabsan xirashada dharka iyo qalabka kale ee shaqada.
- Heshiiskani waxa uu baabi'inayaa dacwaddii horey loo diiwan geliyey ee ku saabsanayd ku xadgudubka sharciga shaqaalaha ee dawladda dhexe, kan Minnesota, iyo sharci goboleedka Wisconsin ay shirkadda Gold'n Plum ay waajib ku tahay in ay siiso lacag shaqaalaheeda waqtiga kaga baxa xirashada iyo iska bixinta dharka iyo qalabka shaqada. Heshiiskani waxa uu baajinayaa lacagta ku baxaysa iyo khatarta ka iman dacawaddan oo sii socota waxaana uu shirkadda Gold'n Plum ka furanayaa inaan qaan dambe lagu lahayn.
- Xuquuqda sharciga ah ee aad leedahay dhib ayaa soo gaari haddii aad ficil la timaado iyo hadii aadan la imanba. **Akhri ogeysiiskan si feejigan.**

<b>XUQUUQDA AAD SHARCIGA U LEEDAHAY IYO DOORSHADA UU KU SIINAYO HESHIISKAN</b>	
<b>SOO GUDBI QAANSHEEGASHO CODSI KA HOR JUNE 1, 2008.</b>	Sida kaliye ee aad ku heli karto lacag lagu siiyo.
<b>KA HAR OO CADEE INAADAN KA MID AHAYN INTA KA HOREYSA MARCH 31, 2008.</b>	Lacag ma helaysid. Waxayse kuu ogolaanaysaa inaad ka qayb qaadata dacwad kale oo loo haysto shirkadda Gold'n Plump adiga oo laga duulayo waxyaabaha gaarka ah ee sharciga heer gobol ee dawadan loo adeegsaday.
<b>DIID OO CADDEE INAADAN OGOLAYN KA HOR MARCH 31, 2008.</b>	Wargeli maxkamadda iyo qareenada dacwaddan ku jira sababta aadan rabin inaad ka qayb qaadata heshiiskan. Arag su'aasha 17aad.
<b>WAX FICIL AH HA QAADIN.</b>	Lacag ma helaysid. Waxaadna ka tanaasushay xuquuqdaadii.

- Xuquuqdan iyo doorashooyinka lagu siiyey – intuba waxa ay leeyihiin taariikho go’an oo laga jawabo – kuwaas oo lagu qeexay ogeysiiskan. Si lagu siiyo lacag, waa in aad ka jawaabtaa inta ka horeysa June 1, 2008.
- Maxkamadda dacwaddan gacanta ku haysa ayaa go’aan ka gaaraysa in ay ogolaato heshiiskan iyo in kale. Lacagta waxaa la bixinayaa haddii ay maxkamaddu ogolaato heshiiska iyo ka dib marka racfaanku xal laga gaaro, haddiiba uu jiro. Fadlan hala xiriirin maxkamadda si aad u ogaato qaybta lacageed ee aad helayso.

**XOGTA AASAASIGA AH ..... BOGGA 3**

1. Maxaa la iigu soo direy ogeysiinkan?
2. Maxay dacwaddani ku saabsan tahay?
3. Maxay dacwaddani u noqotay mid dad badani wadaagaan?
4. Maxaa heshiis loo gaarayaa?

**YAA KA QAYB QAADANAYA HESHIISKA? ..... BOGGA 4**

5. Sidee ayaan ku ogaan karaa inaan heshiiska qayb ka ahay?
6. Ma hubayo in aan qayb ka ahay dacwadan.

**FAA’IIDADA LAGA HELAYO HESHIISKA – QAYBTA AAD HELAYSO ..... BOGGA 4**

7. Maxaa laga helayaa heshiiska?
8. Imisa ayey noqonaysaa qeybta lacageed ee aan helayo?

**SIDEE AYAAD HELAYSAA LACAGTA - SOO GUDBINTA QAANSHEEGASHADA ..... BOGGA 5**

9. Sideen ayaan ku helayaa qeybteyda lacageed?
10. Goorma la I siinayaa lacagta?
11. Maxaan ka tanaasulayaa si aan u helo lacagta ama aan uga mid noqdo dacwaddan?

**HADDII AADAN RABIN IN LACAG LAGAA SIIYO HESHIISKAN ..... BOGGA 6**

12. Sidee ayaan uga baxaa ka mid ahaanshaha dacwaddan?
13. Haddii aanan iska reebin, Ma dacweyn karaa Gold’n Plump tan oo kale ah mar dambe?
14. Haddii aan ka baaxo, Lacag ma ka helayaa heshiiskan?

**QAREENADA WAKIILKA KAA AH ..... BOGGA 6**

15. Ma leeyahay qareen wakiil iiga ah dacwadan?
16. Sidee lacagta qareenada loo bixinayaa?

**DIIDMADA AAD DIIDO HESHIISKAN ..... BOGGA 7**

17. Sidee ayaan u wargeliyaa maxkamadda in aan jeclayn heshiiskan?
18. Waa maxay faraaqa u dhaxeeya diidmada iyo ka bixitaanka dacwada?

**DHAGAYSIGA MAXKAMADDA EE LAGU OGOLAANAYO HESHIISKAN ..... BOGGA 8**

19. Goorma iyo halkee ayaa maxkamaddu go’aan ka gaareysa heshiiskan?
20. Miyaa la iga doonayaa inaan imaado dhagaysiga dacwadda?

**HADDII AADAN WAXBA SAMAYN ..... BOGGA 8**

21. Maxaa dhacaya haddii aanan waxba sameyn gebi ahanba?

**HELITAANKA XOG DHEERAAD AH ..... BOGGA 8**

22. Ma jiraan xog dheeraad ah oo ku saabsan heshiiskan?
23. Sidee ayaan ku heli karaa xog dheeraad ah?

## **XOGTA AASAASIGA AH**

### **1. Maxaa la iigu soo direy ogeysiinkan?**

Diiwaanka Shirkadda digaaga ee Gold'n Plump waxa uu cadeynayaa inaad shaqaalahooda ka mid tahay ama aad horey ugu shaqaysay adiga oo ahaa qof ka tirsan shaqaalaha warshadda ama kuwa nadafadda. Maxkamadda ayaa kuu soo dirtey ogeysiiskan waayo xaq ayaad u leedahay inaad ogaato heshiiska la soo jeediyey ee ku wajahan dacwadda wadajirka loogu soo oogay shirkadda iyo doorashooyinka aad haysato, inta aanay maxkamaddu go'aan ka gaarin inay ogolaato heshiiskan. Dacwaddaas waxaa loo yaqaan frank, et al. v. Gold'n Plump Poultry Inc., dacwad wadajir loo diiwaan geliyay lambarkeeduna yahay 04-1018 (PJS/RLE) (Maxkamadda Minnesota).

Haddii ay maxkamadu ogolaato heshiiskan, isla markaana xal laga gaaro diidmada iyo racfaan ka qaadashada, hadiiba ay jiraan, maamule ay maxkamaddu u qabatay ayaa qaybin doona lacagta uu heshiisku ogolaaday. Haddii aad soo gudbiso codsiga qaansheegada ee ku lifaaqan ogeysiiskan, waxaa lagu wargelinayaa hadba xaalka heshiisku meesha uu marayo.

Ogeysiiskani waxa uu qeexayaa, heshiiska, xuquuqda aad xaq u leedahay, faa'iidada aad ka helayso, yaa xaq u leh, iyo sidii aad xuquuqdaas ku heli lahayd. Dadka qaar ka shaqeeya shirkadda Gold'n Plump waxa loo soo direy ogeysiis kan ka duwan Dadkaasi waxa ay horey uga jawabeen ogeysiis ku saabsanaa dacwad si wadajir ah loo diiwaangeliyey sanadkii 2006dii, sidaa darteed ayaa loogu soo direy ogeysiis wax yar ka duwan ogeysiiskan.

### **2. Maxay dacwaddani ku Saabsan tahay?**

Shaqaalaha warshadda iyo kuwo nadaafaddu waxay sheegei\$\$\$\$\$n\$ aan lagu siin lacag dheeraad ah "heeryo rarid iyo dajin" taasoo waqtiga kaga baxa xirishada iyo bixinta dharka iyo qalabka shaqada, nadiif ka dhigida Dharka iyo qalabka shaqada loo xirto, iyo waqtiga socodka. Shaqaalaha shirkadda iyo kuwo horey ugu shaqayn jirey ayaa diiwan geliyay dacwad iyaga oo weydiisanaya in magdhaw laga siiyo waqtii hore ee kaga baxay xirashada iyo qalabka sida uu qabo sharciga shaqaalaha ee dawladda dhexe (FLSA), Sharciga Shaqaalaha Minnesota (MFLSA) iyo Sharciga Shaqaalaha ee gobolka Wisconsin (WFLSA), iyo sharciga guud ee gobolka Wisconsin iyo Minnesota.

Gold'n Plump ma aysan ogolayn in wax lagu leeyahay markii ay gashay heshiiskan. Gold'n Plum way diidan tahay codsiga lagu sheegay dacwadda liddiga ku ah. Gold'n Plump waxa ay ku doodaysaa in ay shaqaalaha siisay wixii lacag ahaa iyo waqtigii dheerigi ahaa ee ay ku mutaysteen shaqadii ay qabteen. Waxay kaloo Gold'n Plum ku doodaysaa in ay u hogaansantay sharciyada heer dawladeed, mushaharka iyo lacagta saacaddii la bixiyo ee heer gobol, taasoo ay ka mid tahay FLSA, kan MFLSA iyo kan WFLSA. Ilaa haddiiba uu jiro xadgudub loo gaystay sharciga dawladda dhexe, kan heer gobol, Gold'n Plump waxa ay ku doodaysaa in dhaqankeedu ahaa mid niyad wanaag loo sameeyay shaqaalahana xuquuqdooda loo siiyey iyada oo laga ambaqaadayo sida sharciga dawladda dhexe iyo kan heer gobol uu dhigayo.

### **3. Waa maxay sababta dacwadani u tahay mid dad badan u dhaxeysa?**

Dacwaddan waxa horey loogu aqoonsaday mid wadajir loo diiwan geliyay sida uu qabo sharciga dawladda dhexe ee FLSA. Dacwadaha noocan oo kale ah, qof ama ka badan oo isku dacwad ah sida uu dhigayo sharciga dawladda dhexe ee FLSA oo tirsanaya inaan si sax loo siin xuquuqdoodii shaqadii ay qabteen ayaa diiwaangeliyey dacwad ay u dhan yihiin. Ogeysiiskan, shaqaalaha dacwaddan diiwan geliyey ee soo gudbiyey qaansheegashada ayaa loogu yeeraa "FLSA Class". Kama mid ihid dadkaas waayo ma aadan buuxin foomka dacwadda sanadkii 2006 adiga oo cadeynaya inaad dooneysid inaad ka mid noqoto dadka dacwada sida wadajirka ah u diiwaan geliyey. Sidaa darteed qayb kama tihid heshiiska la gaaray ee lagu xalinayo dacwadda FLSA.

Dacwaddan waxaa si wadajir ah loogu soo oogay sharciga gobolada Minnesota iyo Wisconsin oo la mid ah sharciga dawladda dhexe ee FLSA, iyo sidoo kale sharciga guud. Ogeysiiskan, shaqaalaha dacwaddo heer gobol ku saleysan tahay waxaa loogu yeerayaa Heshiiska dacwadda wadajirka ah ee sharciga 23aad "Rule 23 Settlement Class."

Waad ka mid tahay Heshiiska sharciga 23aad haddii aad u shaqaale ka tahay ama aad horey shaqaale uga ahayd Gold'n Plump mudada ku cad faqrada shanaad ee ogeysiiskan. Sharciga 23aad waxaa wakiil u ah dacwo soo oogayaasha Jason Frank, Erick Peasley, Wiliam Waters, iyo Robert Wilhels, kuwaas oo u shaqaale ka ah ama horey shaqaale uga ahaa, looguna yeero "wakiilada dacwadda wadajirka loo diiwan geliyay".

Qaaliga sharafta leh ee Patrick J. Schiltz ee maxkamadda dawladda dhexe xafiiskeeda Minnesota ayaa dacwadaas gacanta ku haya.

#### **4. Maxaa Heshiis loo Gaarayaa?**

Maxkamaddu weli go'aan kama aanay gaarin ay si gaar ah gar u siinayso dacwoodayaasha ama Gold'n Plump. Waxa ay labada dhinac isku raaceen inay heshiis gaaraan ka dib markii muddo afar sanadood wada hadal iyo gorgortan u socday, Todobaadyo ka hor intii aan balan loo qaban waqtiga dacwadda la dhageysanayo.

Dacwoodayaasha horey loo soo sheegay iyo qareenadooda ayaa heshiiskan soo gunaanaday, iyaga oo ku saleynaya baaristii ay sameeyeen xisaabatana ku daray dood dheer oo xaqiiqo doon ah iyo arrimaha sharciga ee dhaqangalka ah, waqtiga iyo kharashka loo bahanayo si maxkamad loogu gudbiyo dacwaddan, kharashka ku baxaya haddii wadhadalku sii dheeraado, iyo xaquuqda ay helayaan dacwoodayaasha haddii heshiiskan la gaaro, waxay ay gaareen in ay haboon tahay isla markaana caddaaladda ku dhowdahay dantoodu ku jirto in dacwoodayaasha magacyadoodu kor ku xusan yihiin iyo dadka ay wadajir dacwadda ula diiwaan gelinayaan ay heshiis la gaaraan shirkadda Gold'n Plump. Maxkamaddu waxa ay wax kama jiraan ka soo qaaday dacwado hore oo loo soo gudbiyay oo lagu soo bandhigay sharciga guud, waxaana loo qabtay maxkamada dacwadooda lagu dhagaysto qaar shaqaalaha ka mid ah bisha Febraayo ee 2008ka. Heshiiskan oo la gaaraa, qof kasta waxa uu ka badbaadiyaa kharashka kaga bixi lahaa dhagaysiga dacwadda, shaqaalaha dhibaataadu soo gaartayna waxa ay helayaan magdhaw.

### **YAA KA QAYB QAADANAYA HESHIISKAN**

#### **5. Sidee ayaan ku ogaan karaa inaan heshiiska qayb ka ahay?**

Waxaad shuruud la'aan aad ka mid tahay dadka heshiiska lala gaaray sida uu qabo sharciga heer gobol haddii la timaado mid ka mid ah shuurudaha ku xusan "Sharciga 23aad ee heshiiska wadajirka ah" (Haddii aadan iska reebin heshiiskan sida ku cad faqarada 12aad ee ogeysiiskan)

Shaqaalaha u shaqeeya ama horey uga tirsanaa shaqaalaha wax soo saarka ama nadaafadda, kuwaas loo yaqaan shaqaalaha aan laga reebin (nonexempt) oo saacadda lagu siiyo ee qaybta helitaanka digaaga nool, qaybta nadiifinta uur ku jirta, wajiga labaad ee warshadeynta, iyo nadaafadda ee Gold'n Plump ee Minnesota muddadii u dhaxeysay Febraayo 24, 2001dii ilaa Diseembar 21, 2007kii. Ama u shaqeeynayay shirkadda Gold'n Plump ee Wisconsin wakhti ka mid ah intii u dhaxeysay bishii Febraayo 24, 2002 ilaa Diseembar 21, 2007, waxa ay xubno ka yihiin "Sharciga 23 ee wadajir heshiis u gaarista."

Sharciga 23 ee wadajir heshiis u gaarista kuma jiraan shaqaalaha ka shaqeeya ama horey ugu shaqeyn Jirey shirkadda nadaafadda ee Kaiser's.

Shaqaalaha uu taabanayo sharciga 23 ee wadajir heshiis u gaarista iyo shaqaalaha kale ee uu difaacayo sharciga dawladda dhexe ee FLSA, waxaa la isku yiraahdaa "xubnaha dacwada" ee ogeysiiskan.

#### **6. Weli ma hubo inaan qayb ka ahay dacwadaan**

Haddii aadan weli hubin in aad qayb ka tahay dacwadan iyo in kale, waxa aad codsan kartaa caawinaad lacag la'aan ah. Waxad la soo xiriir kartaa 1-877-242-4875 ama aad soo booqn kartaa [www.goldnplumpsettlement.com](http://www.goldnplumpsettlement.com) si aad u hesho xog dheeraad ah. Ama waxa aad soo buuxin kartaa foonka qaaansheegashada ah ee lagaga hadlay su'aasha 9aad, si aad u ogaato inaad ka mid noqon karto.

### **FAA'IIDADA LAGA HELAYO HESHIISKA – QAYBTA AAD HELAYSO**

#### **7. Maxaa laga helayaa heshiiska?**

\$1.2 milyan ayaa loo qaybinayaa xubnaha heshiiska oo dhan (iyo dadka wakiilada ka ah) ee soo gudbiya dacwad rasmi ah.

Waxaa intaa dheer, in heshiisku ay ku jirto in Gold'n Plump in ay bedesho sida ay shaqaalaha u siiso lacagta wax ka yar ka dib marka heshiiskan dhaqangalo. Gaar ahaan, inta aanu waqtiga shaqada ee Gold'n Plump waxaa shirkadda laga doonayaa iney shaqaalaha u ogolaato in ay waqtigooda shaqada ka biloowdo inta aanay xiran dharka iyo qalabka ee shaqada ee aan loo ogolayn in ay guryahooda u qaataan, isla markaana waqtigooda shaqada uu dhamaado ka dib marka ay iska bixiyaan dharka iyo qalabka shaqada. Gold'n Plump weli iyada ayaa u madax banaan waqtiga ugu horeeya ee shaqaalaha shaqada soo galayaan ama ka baxayaan shaqalaha waxaa laga doonayaan in ay shaqada ka baxaan sida ugu dhaqasaha badan marka ay dharka iyo qalabka shaqada iska bixiyaan. Gold'n Plump waxaa waajib ku ah inay shaqaalaha siiso 33 daqiiqo waqtiga cuntada ah (taas oo 30 daqiiqo oo ka mid aan lacag loo xisaabayn) shaqaalaha xaqa u leh waqtida cuntada.

#### **8. Imisa ayey noqonaysaa qeybta lacageed aan helayo?**

Lacag go'an laguma siinayo – lacagta la siinayo shaqaalaha wax yar bey kala duwanaaneysaa, waayo lacagtani heshiiskani bixinayo waxay ka soo jeedaa “lacago hore oo ururay” oo ah abaal marin shaqaalaha loo siinayo waqtigii dheeraadka ahaa ee ay shaqeeyeen sida ku cad faqrada 5aad ee ogeysiiskan.

Qofka maamulaya qansheegashadan iyo dadka dacwada sida wadajirka ah u soo gudbiyey ayaa wada xisaabaya qaybta lacageed ee aad helayso iyadoo adeegsanaya nidaam la isku raacay oo heshiiska ku xusan iyo xog laga soo ururiyey diiwaanka mushaharkii horey lagu siiyay. Waa inaad soo buuxisaa oo aad soo dirtaa foomka qaansheegashada si aad xaq ugu yeelato inaad lacagtan wax ka hesho, laakiin lagaama doonayo inaad xisaabto inta lacag ee aad helayso, ama aad keento cadeymo la xiriira mushaharadii aad horey u qaadatay intii aad shirkaddan u shaqaynaysay.

Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah ee ku saabsan sida loo xisaabay lacagta kugu soo beegmaysa, fadlan ku noqo heshiiska ama la soo xiriir 1-877-242-4875.

### **SIDEE AYAAD KU HELAYSAA LACAGTA LAGU SIINAYO – SOO GUDIBINTA FOOMKA QAANSHEEGASHADA**

#### **9. Sidee ayaan ku helayaa qaybteyda lacageed ?**

**Waa in aad soo dirtaa foomka qaansheegashada si aad xaq ugu yeelato in aad lacagtan wax ka hesho.** Foomka qaansheegashada waxa uu ku lifaaqan yahay ogeysiiska. Foomka soo buuxi kuna soo dir baqshadda la socota, waa in ay boostada soo gaartaa ugu dambayn 1da Bisha Juun 2008da.

Waxaa kale oo foomkaas aad ku heli kartaa barta internetka ee [www.goldnplumpsettlement.com](http://www.goldnplumpsettlement.com) ama la soo xiriir 1-877-242-4875.

#### **10. Goorma ayaan ku helayaa qaybteyda lacageed ?**

Waxaa jira dhagaysi maxkamadeed oo la qabanyo **Abril 17, 2007**, kaas oo go'an lagaga gaarayo in maxkamaddu ogolaato heshiiskan. Haddii qaaliga dacwadda gacanta ku haya ogolaado, ka dib waxa muddo la siinayaa racfaan ka qaadashada. Qof kasta oo soo direy foomka qaansheegashada waa la wargelinayaa hadba meesha heshiisku marayo. Fadlan dulqaad la imaada.

#### **11. Maxaan ka tanaasulayaa si aan u helo lacagta ama aan uga mid noqdo dacwaddan?**

In aad adigu iska saartay ma ogiye, waxa aad xubin ka tahay dacwadan sida uu qabo sharciga 23 ee wadajir heshiis u gaarista, taas macnaheedu waxaa weeye in aadan soo gudbin Karin dacwad kale, ama aadan qayb ka noqon Karin dacwad kale oo lagu soo oogo Gold'n Plump ee sharciyad ee ku xadgudubka sharciyada shaqaalaha ee heer gobol. Waxay kaloo taasi ka dhigan tahay in amarka maxkamaddani soo saarto uu ku saamaynayo sharci ahaana ay tahay inaad u hogaansanto.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, Maadaama aadan qayb ka ahayn dacwada lagu diiwaangeliyay sharciyada shaqaalaha ee dawladda dhexe (FLSA), waad ku oogi kartaa dacwad (ama sii wadi kartaa dacwaddan) Gold'n Plump adiga oo cuskanaya sharci gaar ah oo ku xusan kan dawladda dhexe.

## HADDII AADAN RABIN IN LACAG LAGA SIIYO HESHIISKAN

Haddii wax lacag ah ka rabin heshiiskan, laakiin aad doonayso inaad xaq u yeelato inaad dacwad ku oogi karto Gold'n Plump kali ahaantaa sida uu qabo sharciga heer gobol, waa inaad qaadaa talaabooyin aad kaga baxayso heshiiska lagu gaarayo dacwaddan. Tan waxaa lagu magacaabaa iska saaridda heshiiska “kama mid noqoshada” sharciga 23 ee heshiiska wadajirka loo gaaray.

### 12. Sidee ayaan uga baxaa ka mid ahaanshaha Dacwaddan?

Haddii aad rabto inaad iska saarto sharciga 23 ee heshiiska wadajirka loo gaaray, Waa inaad warqad qoraal ah soo dirtaa si aad isaga reebto *Frank, et al. v. Gold'n Plump Poultry, Inc., civil action No. 04-1018 (PJS/RLE)*. Waa inaad ku soo qortaa magacaaga oo buuxa, cinwaankaaga, telifoonkaaga, lambarkaaga sooshaalka, watiga aad u shaqaalaha ka ahayd Gold'n Plump iyo shaqadi aad qaban jirtey, saxiixaaga, iyo odhaah aad ku codsnaayso in lagaa reebo ama aadan qayb ka ahayn sharciga 23aad ee heshiiska wadajirka loo gaaray adiga oo ujeedada warqaddada ka dhigaya “Codska ka saarid /reebid”. Waa in aad warqadda saxiixdaa ama uu saxiixaa qof aad wakiilatay.

Haddii aad codsato in lagaa reebo dacwaddan, ma diidi kartid heshiiskan, wax lacag ahna kama helay sid. Waajibna kuguma aha inaad u hogaansanto wax walba oo dacwadaas ka soo baxa. Waxaad kaloo aad awood kartaa inaad iskaa u dacwad ugu soo oogto (ama aad dacwad sii waddo) liddi ku ah Gold'n Plump mustaqbalka oo ku saabsan dacwad oo la mid ah qaansheegashada dacwaddan lagu soo gudbiyay.

Waa in codsiga ad isaga saarayso aad u soo dirtaa ugu dambayn 31ka Maarso 2008 meelaha soo socda:

*Clerk of Court*

United States District Court  
for The District of Minnesota  
202 U.S. Courthouse  
300 South Fourth Street  
Minneapolis, MN 55415

*Settlement Class Counsel*

T. Joseph Snodgrass  
Larson King, LLP  
2800 Wells Fargo Place  
30 East Seventh Street  
St. Paul, MN 55101

*Gold'n Plump Counsel*

R. Scott Davis  
Briggs and Morgan, P.A.  
2200 IDS Center  
80 South Eight Street  
Minneapolis, MN 55402

### 13. Haddii aanan iska reebin heshiiskan, Ma dacweyn karaa Gold'n Plump tan oo kale ah mar dambe?

Maya, Ilaa aad iska reebto heshiiskan, waxa aad ka tanaasuleysa xaqqa aad dacwad ku soo oogi karto Gold'n Plump ee ku xadgudbka sharciyada heer gobol ee heshiiskan lagu xaliyay. Haddii ay jirto dacwad kale oo gaar kuugu socota, la tasho qareenkaaga sida ugu dhakhsaha badan. Waa in aad dacwadaan iska reebtaa si aad u wadato dacwadaada gaarka ah ee liddiga ku ah Gold'n Plump ee ku xadgudubka sharciyada heer gobol. Xusuusnoow, waa in aad codsigaaga soo gudbisaa ugu dambayn 31ka Maarso 2008.

### 14. Haddii aanan iska reebin heshiiskan, Ma dacweyn karaa Gold'n Plump tan oo kale ah mar dambe?

Haddii aad iska saartay dacwaddan, wax lacag ah kama helay sid heshiiskan. Laakiin waa inaad ogaataa haddii aad shaqaale ka tahay Gold'n Plump wixii is bedel ah ee lagu sameeyo nidaamka shaqada ee lacagta lagu siiyo shaqaalaha u shaqeeya shirkadda – sida lacagta lagu siinayo waqtiga ay dharka xirtaan iskana bixiyaan – adigana waa ku saameynaysaa.

## QAREENADA WAKIILKA KAA AH

### 15. Ma leeyahay qareen wakiil iiga ah dacwadan?

Qof kasta oo buuxiyay foomka qaansheegashada isla markaana aan codsan in laga saaro waxa uu leeyahay qareen dacwadan wakiil uga ah. Maxkamaddu waxa ay u xilsaartay Larson King, LLP, iyo Zemmerman Reed, PLLP, in ay heshiisnaan agaasimaan. Waad ka qayb geli kartaa dhageysiga shaqsi ahaan ama qof adiga mas'uul kaa ah oo aad qoratay. Haddii aadan sidaa dooneyn, waxaa wakiil kaa ah dadka heshiiska agaasimaya. **Ma bixinaysid lacagta qareenkanada dacwadan wakiilka kaaga ah in aad qabsato qareen gaar ah ma ogiye, kaas oo aad lacagtiisa bixineysid.**

## 16. Sidee lacagta qareenada loo bixinayaa?

Ma aha waajib inaad bixisid lacagta qareenada dacwaddan si aad wax uga hesho lacagta \$1.2 milyan ama aad ka faa'iideysato faa'iidada ka dhalanaysa oo ah shirkadda Gold'n Plump oo bedelysa sida shaqaalaha lacagta ay u siiso marka heshiiskani dhaqan galo.

Qareenada wakiilka idinka ah waxa ay maxkamadda weydiisanayaan in ay ogolaato in la siiyo magdhaw \$2,675,000 oo ah kharashkii kaga baxay muddadii afarta sano aheyd ee uu socday wada hadalka, ku soo wargeliyaan heshiiskan, in lacag la siiyo qofkii maamulay lacagta la qaybinayo iyadoo dib loo eegayo dokumeentiga la soo gudbiyay, bixinta lacagta sharciga ah ee ka dhalatay lacagta dib loo bixiynayo. Kharashka ka baxay qareenada waxaa ka mid laakiin ka badnaan kara 1) In ay qolo kale oo ka madaxbanaan ay kala taliso waqtiga shaqaalaha kaga maqan xirashada iyo bixinta dharka iyo qalabka shaqada, 2) Shaqaalaha maxkamadda ee loogu yeeray iney diiwan geliyaan maragkac ay sameeyeen 30 markhaati oo ku marag furay Gold'n Plump. 3) In ay shaqaaleeyeen xafiis qaabilsan qaybinta lacagta, kaas oo eegaya diiwaanka, isaga oo lacagta siin doona qof kasta oo soo gudbiyey qaansheegasho sax ah. Lacagta ay qareenadu ku qaadanayaan adeega sharciga ah ee ay qabteen kaas oo dhalay heshiis dan u ah shaqaalaha horey ugu shaqeyn jirey, kuwo hadda ka shaqeeya iyo kuwo mustaqbalka u shaqayn doona. Lacagta kharashka ah ee ku baxday hoos uma dhigeysa lacagta la siin lahaa shaqaalaha iyo xubnaha dacwaddan, mana aha mid mustaqbalka ka daynaya. Gold'n Plump ayaa si gaar ah u bixinaysa kharashka qareenada wakiilka ka ah dadka dacwada si wadajir ah u diiwaan geliyey.

Waxaa intaa dheer, in qareenadu ay maxkamadda ka codsanayaan in ay ogolaato in lagu abaal mariyo midkiiba \$12,500 John Frank, Erich Peasley, Robert Wilhelm, and William Waters shaqadaii ay qaybteen diiwangelinta dacwadda wada jirka ah. Adeegyadaas waxaa ka mid ah inay abuureen dacwaddan, inay maragkac ka sameeyeen dhagaysigii dacwaddan, iyo siinta xogtii ay u baahnaayeen qareenadu.

## DIIDMADA AAD DIIDO HESHIISKAN

Waad u sheegi maxkamadda in aadan ogolayn heshiiskan ama qeyb ka mid ah

## 17. Sidee ayaan u wargeliyaa maxkamadda in aan jeclayn heshiiskan?

Waad diidi kartaa heshiiskan haddii aad jeclayn qayb ka mid ah. Waxaad soo gudbin kartaa sababta aad aaminsan tahay in aanay maxkamaddu ogolaan heshiiskan. Maxkamaddu wey tixgelinaysaa aragtidiina. Si aad u diido, waa inaad maxkamadda u soo gudbisaa waraaq aad saxiixday oo ay ku cadahay inaad diidan tahay heshiiska *Frank, et al. v. Gold'n Plump Poultry, Inc., civil action No. 04-1018 (PJS/RLE)*. Waa inaad ku soo qortaa magacaaga oo buuxa, cinwaankaaga, telefoonkaaga, lambarkaaga sooshaalka, watiga aad shaqaalaha ka ahayd Gold'n Plump iyo shaqadi aad qaban jirtey, saxiixaaga, iyo odhaah aad ku caddeysnayso sababta aad ku diidan tahay. Khasab ma aha inaad timaaddo dhagaysiga maxkamaddu ku ogolaanayso si loo tixgeliyo diidmadaada.

Waa in diidmadaadu loo soo diraa maxkamadda, qareenada iyo Gold'n Plump cinwaanadooda hoos ku qoran ugu dambayn 31ka Maarso 2008 meelaha soo socda:

*Clerk of Court*  
United States District Court for  
The District of Minnesota  
202 U.S. Courthouse  
300 South Fourth Street  
Minneapolis, MN 55415

*Settlement Class Counsel*  
T. Joseph Snodgrass  
Larson King, LLP  
2800 Wells Fargo Place  
30 east Seventh Street  
St. Paul, MN 55101

*Gold'n Plump Counsel*  
R. Scott Davis  
Briggs and Morgan, P.A.  
2200 IDS Center  
80 South Eight Street  
Minneapolis, MN 55402

## 18. Waa maxay faraaqa u dhaxeeya diidmada iyo ka bixitaanka dacwada?

Diidmadu waa adiga oo maxkamadda wargeliya inaad jeclayn qayb heshiiska ka mid ah. Waxaad diidi kartaa oo kaliya haddii aad ka mid tahay dadka wadajirka u diiwaangeliyay. Marka aad iska saarto waxa aad maxkamadda wargelineysaa inaad dooneyn inaad qayb ka ahaato dacwaddan. Haddii aad iska saarto, ma diidi kartid waayo dacwaddu kuma saameyneyso.

## **DHAGAYSIGA MAXKAMADDA EE LAGU OGOLAANAYO HESHIISKAN**

### **19. Goorma iyo halkee ayaa maxkamaddu go'aan ka gaareysaa heshiiskan?**

Maxkamaddu waxa ay qabanaysaa dhagaysigii ugu dambeeyay ee lagu ansixinayay heshiiskan 8da aroornimo ee maalinta Khamiista ah ee bisha Abriil 17keeda 2008, Xarunta Maxkamadda Dawladda Dhexe xafiiskeeda Minnesota ee cinwaankeedu yahay 778 Federal Building, 316 N. Robert Street, St. Paul, Minnesota, qolka 3aad. Dhagaysigan maxkamaddu waxa ay tixgelinaysaa in heshiisku yahay mid caddaalad ah, caqli gal ah, isla markaana ku haboon. Haddii ay jiraan diidmo, maxkamaddu way tixgelinaysaa. Dahagysiga ka dib, maxkamaddu waxa ay tixgelinaysaa in ay ogolaato.

### **20. Miyaa la iga doonayaa inaan imaado dhagaysiga dacwadda?**

Maya, su'aalaha qaaligu qabo waxaa ka jawaabaya qareenada wakiilka idinka ah. Laakiin waan idin soo dhaweynayanaa haddii aad donaysaan in aad timaadaan dhagaysiga adinka oo kharashkiina isu qaba, adinka oo taageersan ama ka soo horjeeda dacwada.

Haddii aad soo dirtey qoraal diidmo ah, khasab ma aha in aad timaaddo oo aad maxkamadda ka hadasho. Mar haddii aad soo dirtey diidmadaada waqtigii ku haboonaa, maxkamaddu way tixgelinaysaa. Waxaa kale oo aad qabsan kartaa qareen gaar ah oo kaa wakiil ah, laakiin muhim ma aha.

## **HADDII AADAN WAXBA SAMAYN**

### **21. Maxaa dhacaya haddii aanan waxba sameyn gebi ahanba?**

Haddi aanan soo dirin foomka qaansheegashada, ma helaysid wax lacag ah. Haddii aanan soo dirin foomka aad dacwadan isaga saarayso, waxa aad ka tanaasuleysaa xaqa aad mar kale dacwad ku soo oogi karto Gold'n Plump arrimaha heshiiskan lagu xaliyay ee ku xadgudubyada sharciyada Minnesota iyo Wisconsin.

## **HELITAANKA XOG DHEERAAD AH**

### **22. Ma jiraan xog dheeraad ah oo ku saabsan heshiiskan?**

Ogeysiiskani waxa uu soo koobayaa heshiiska la soo jeediyay. Xog dheeraad ahw axaa laga heli karaa heshiiska. Nuqul ka mid ah heshiiska waxaad ka codsan kartaa qareenada idinka wakiilka ah dacwaddan oo cinwaankooda kor lagu sheegay, ama waxa aad soo booqan kartaa barta internetka ee [www.goldnplumpsettlement.com](http://www.goldnplumpsettlement.com) ama soow ac 1-877-242-4875.

### **23. Sidee ayaan ku heli xog dheraad ah?**

Waxa aad soo wici kartaa 1-877-242-4875, u soo qor Gold'n Plump, PO. BOX 2002, Chanhassen, MN 55317-2002 ama soo booqo barta internetka ee [www.goldnplumpsettlement.com](http://www.goldnplumpsettlement.com) halkaas oo aad ka heli karto jawaabaha su'aalaha guud ee ku saabsan heshiiskan, foomka qaansheegashada, iyo xog kale oo kaa caawineysa in aad ogaato inaad xubin ka tahay dacwadan iyo in kale isla markaana aad xaq u yeelanayso in aad lacag ka hesho.

## **FADLAN HALA XIRIIRIN MAXKAMADDA IYO XOGHAYNTA MAXKAMADDA SI AAD U HESHO MACLUUMAAD**

**Gold'n Plump Claims Administrator  
Analytics, Inc.  
P.O. Box 2002  
Chanhassen, MN 55317-2002**

**Complete and Sign  
this Form and Return  
Postmarked No Later Than  
June 1, 2008**

**FOOMKA QAANSHEEGASHADA (CLAIM) EE HESHIISKA GOLD'N PLUMP**

**WRITE ANY NAME AND ADDRESS CORRECTIONS BELOW OR  
IF THERE IS NO PREPRINTED DATA TO THE LEFT, YOU MUST  
PROVIDE YOUR NAME AND ADDRESS HERE:**

Name:

Address:

Cinwaanka oo dhan:

Gobolka iyo Nawaaxiga (Zip):

**PLEASE COMPLETE THE FOLLOWING:**

Telefoonka Guriga ama Gacanta:

Telefoonka shaqada (khasab) ma aha:

Dates worked for Gold'n Plump, and location(s) (not required):

Lambarka Sooshaalka (waa khasab inaad qorto):

**WAXAAN CADEYNAYAA IN MACLUUMAADKA KOR KU QORAN UU SAX IYO RUN YAHAY.**

Saxiix:

Date:

**BUUXI FOOMKAAN OO KU SOO DIR BAQSHADDA LA SOCOTA UGU DAMBEYN 1DA JUUN 2008.  
WAA IN BAQSHADDA AY KU SHAABADAYSAN TAHAY IN LA SOO DIREY KA HOR 1DA JUUN. KU  
SOO DIR CINWAANKAN:**

**GOLD'N PLUMP CLAIMS ADMINISTRATOR  
Analytics, Inc.  
P.O. Box 2002  
Chanhassen, MN 55317-2002  
Telephone: 1-877-242-4875  
[www.goldnplumpsettlement.com](http://www.goldnplumpsettlement.com)**